

# XEERKA ILAALINTA BULSHADA

*Helitaanka, Abuurista, Ilaalinta, iyo Kor u qaadida Booska Kor ka Furan, Khayraadka Taariikhiga ah, iyo Guryaha La Awoodi Karo lagana helo guud ahaan Magaalada Boston*

# MAALGELINTA CPA

- **MILKIILAYAASHA GURYAHA**
  - Ku bixi 1% dulsaar ah cashuurta guriga
- **WAAYEELKA & MULKIILAYAASHA GURYAHA EE DAKHLIGOODA HOOSEEYA**
  - Waa laga dhaafay; celceliska mulkiilaha gurigu wuxuu bixiyaa $68/sanadkii
- **IN KA BADAN 20 MILYAN OO DOOLAR AYAA LA URURIYAA SANNADKII**
  - Lacagaha waxa kaliya oo loo isticmaali karaa in lagu maalgeliyo **Guryaha La Awoodi karo, Ilaalinta Taariikhiga ah, Booska Kor ka Furan, iyo Mashaariicda Madadaalada**
- **DEEQDA HEER GOBAL**
  - Kharashka wareejinta hantida ma-guurtada ah ee gobolka oo dhan waxay siisaa lacag sanduuqa kalsoonida ee CPA. Isku aadintan waxa ay kordhisay lacagteena in ka badan $28M sanad walba


SHARAXAADA BARNAAMIJKA CPA

# TIRAKOOBKA CPA

- Waxaan ilaalinay in ka badan 125 dhismayaal taariikhi ah, goobo, maraakiibyo, iyo sheeyaal taariikhi ah
- Lacagaha CPA ayaa beeray in ka badan 305 geed si ay gacan uga gaystaan geedaha Boston
- La dayactiray lana abuuray in ka badan 90 garoomo-ciyaareed iyo goobo madadaalo
- Waxaan abuurnay beero magaalo iyo beero bulshada ku kulmaan
- La ilaaliyay lana abuuray ku dhawaad 2,100 oo guri oo la awoodi karo, tan waxaa ku jira unugyada guri ee la leeyahay
- Mashruucyo guri oo la taageeray oo loogu talagalay askarta, waayeelka, fanaaniinta, iyo shakhsiyaadka guri la'aanta ah
- Waxaa lagu maalgeliyay in ka badan $28M laba barnaamij oo taageera lahaanshaha guri ee markii ugu horreysay kana hortagaya barakaca

# TODOBA WAREEG OO MAALGELIN 2018-2024

Ilaa hadda, Barnaamijka Ilaalinta Bulshada waxa uu maalgeliyey **346 mashruuc** waxana uu ku abaal mariyey in ka badan **$192 milyan** oo maalgelin ah. Waxaan taageernay **54** mashruuc guri oo la awoodi karo, **133** booska kor ka furan iyo mashruuc madadaalo, iyo **159** mashruuca ilaalinta taariikhiga ah ee 2018-2024.



# Waa maxay Dakhliga Dhexe ee Goobta (AMI)

- Cabbirka lagu isticmaalo in lagu go'aamiyo u qalmitaanka waxaa loo yaqaanaa Dakhliga Dhexe ee Goobta **(AMI)**. Maadaamo goob suuqeed walba ay leedahay kharash nololeed iyo heer dakhli kala duwan, **AMI** wuxuu ku salaysan yahay halkaad deggan tahay iyo weyninka qoyskaada.

- Qoys afar qof ka kooban oo ay soo gasho boqolkiiba **80 ee AMI** waxaa soo gashaa **$118,720** sanad walba. Qoys afar qof ka kooban oo ay soo gasho boqolkiiba **30 ee AMI** waxaa soo gashaa taqriiban **$44,520** sanad walba.

- CPA waxay taageertaa guri siinta **gaaraysa ilaa boqolkiiba 100 ee AMI**, ee qoys afar qof ka kooban oo ay soo gasho taqriiban **$148,400** sanad walba.

# **ONE+Boston**, Magaalada oo dhan

## Boston Home Center

**Hoyga la Awoodi Karo 2019-2021 & 2024**






WHAT IS ONE+BOSTON?

A MORTGAGE WITH A HEAVILY DISCOUNTED FIXED INTEREST RATE

Using funds provided by the City of Boston, the ONE+Boston interest rates are 0.5% to 1% below the already discounted ONE Mortgage rates.

INCLUDES ENHANCED DOWNPAYMENT ASSISTANCE

For those first-time homebuyers who qualify, the City of Boston's financial assistance will offer enhanced downpayment and closing cost assistance.

AFFORD MORE WHEN BUYING A HOME IN BOSTON

| MORTGAGE TYPE | CONVENTIONAL | ONE MORTGAGE | ONE+ BOSTON |
|---|---|---|---|
| Purchase Price | $306,000 | $397,000 | $450,000 |
| Your Down Payment Funds | $15,300 | $5,955 | $6,750 |
| Interest Rate | 3.5% | 3% | 2% |
| Private Mortgage Insurance | $322 | $0 | $0 |

**Abaalmarinta CPA:** $12,800,000 (2019-2021 & 2024)

- ONE+Boston Barnaamijka Guri Iibsadaha Waqtiga Kowaad waxa uu taageeraa kororka guryaha la awoodi karo.
- Barnaamijku waxa uu isku daraa dulsaarka la dhimay ee daynta ONE, oo lagu bixiyo MA Housing Partnership (MHP), oo ay weheliso carbuunta/xiridda kaalmada kharashka ee Boston Home Center,
- Ujeedada barnaamijku waa in la kordhiyo awoodda iibsadaha ee dadka deggan Boston ee dakhliga hoose si ay awood ugu yeeshaan guri Boston ah oo la awoodi karo.
- Si aad xaq ugu yeelato, iibsadayaashu waa inay kasbadaan ama wax ka hooseeya 100% AMI.

# **ONE+Boston,** Magaalada dhan

Ilaa **Abriil 2024**, Xaruunta Hoyda ee Magaalada Boston (City of Boston's Home Center) waxay soo afjartay **343** ONE+ Deymo oo leh **$5,521,745** xagga lacagta horumariska ah iyo caawinta kharashka soo afjarka iyo **$4,870,436** xagga caawinta dulsaarka.

- **Fiidiyaha One+Boston**




Booqo bogga internet-ka **homecenter.boston.gov** ama Wac 617-635-4663

# **Barnaamijka Fursada Iibsashada,** Magaalada dhan

Xafiiska Duqa Magaalada ee Hoy Siinta



**Dhismaha Woodbury**
*East Boston*





**4345-4351 Washington St**
*Roslindale*



**Morton Village**
*Mattapan*

**Lacag Bixinta CPA:** $14,000,000

**<u>Faahfaahinta Mashruuca:</u>**

Barnaamijka ka hortagga barakaca ee lagu siinaayo maalgelin guri dhiseyaalka masuulka ah sifo ay u iibsadaan guriyaha kirada ee logu deggan yahay qiimaha suuqa joogo ka dib na dadka ree Boston ee dakhliga hoose iyo dhexe ugu beddelaan guriyaha mulkinimada ilaashan.

# **Kaniisadda Koowaad (First Church) Roxbury,** Roxbury

10 Putnam St, Boston, MA 02119

**Ilaalinta Taarikhda - 2018, 2022**






**Lacag Bixinta CPA (2018):** $150,000

**Lacag Bixinta CPA (2022)**: $343,000

**Faahfaahinta Mashruuca:**

Hagaajinta iyo diyaarinta albaabka xagga galbeedka ee guriga kulanka 1804 iyo dhisidda jaranjarada dadka laxaad la’aanta leh isticmaali karaan sifo si waxtar leh dib logu isticmaalo goobta kaniisadda hore hadda loo beddelo goobta kulanka bulshadda iyo farshaxanka.

# **Schooner Roseway,** Dhexbartanka Magaalada

Fan Pier, Boston, MA 02210

**Ilaalinta Taarikhda - 2018, 2021, 2022**







**Lacag Bixinta CPA (2018):** $250,000

**Lacag Bixinta CPA (2021):** $100,000

**Lacag Bixinta CPA (2022):** $360,000



**Faahfaahinta Mashruuca:**

Sifo dib logu habeeyo oo na dib loo hagaajiyo qaabaynta iyo dhagaxa markabka taarikhiga ee sanadka, sifo loga yeelo mid loo sii isticmaali karo goob taclineed ee ardayda si aasaasi ahaan u dakhli yar ee goobta Boston.

# **Franklin Field Jardiinka Waayeelka,** Dorchester

Ames St. & Westview St, Dorchester, MA 02124 **Goobta Bannaan iyo Madadaalada - 2020, 2023**





**Lacag Bixinta CPA (2020)**: $250,000

**Lacag Bixinta CPA (2023)**: $495,000

**Faahfaahinta Mashruuca:**

Maal gelinta Qaybta I iyo Qaybta II ee lagu hagaajinaayo boos jardiinka bulshadda ee goob deegaanka Franklin Field BHA, taasoo ku jirto jardiinka gudbinta manka ubaxda sifo loo taageero beeridda.

# **Duurka Cunnada Edgewater,** Mattapan

640 River St iyo Burmah St, Boston, MA 02126

**Goobta Bannaan iyo Madadaalada - 2022**



**Lacag Bixinta CPA:** $104,369

**Faahfaahinta Mashruuca:**

Waxaa logu tala galay hagaajinta duur cunno cusub ee bulshadda taasoo lagu hagaajinaayo booska bannaan ee aagga 11,816 SF leh sifo logu isticmaalo madadaalada tooska iyo nasashada oo qabta beer bulsho, waddo socod, iyo goob jardiineed.


SHURUUDAHA SHARCIGA
GOBOLKA CPA

# XEERARKA U BAAHAN SHARCIGA GOBOLKA

- *10% ee lacagaha CPA waa in lagu kharash gareeyaa baakeed kasta sannad kasta: Ilaalinta Taariikhiga ah, Guryaha La Awoodi Karo, Booska Kor ka Furan iyo Madadaalada*
- *Ilaa 5% ayaa laga yaabaa in lagu kharash gareeyo kharashaadka maamulka*
- *Mashruucyada Raasumaalka oo kaliya ayaa la maalgelin karaa - lama bixiyo dayactirka, hawlgalka ama barnaamijka*
- *Qaatayaashu waxay noqon karaan hay'ado dowli ah iyo kuwa gaar loo leeyahay, aan faa'iido doon ahayn & kuwo faa'iido doon ah*
- *CPA waxaa loo isticmaali karaa: Hel, Abuur, Ilaali, Taageero, Dib u Habee/Dib usoo Celi*




Community Preservation Coalition
Preserving our past. Building our future.

# ISTICMAALKA LOO OGOLYAHAY LACAGAHA CPA

Isticmaalka la ogol yahay ee lacagaha CPA waa mid xadidan oo si kooban uu u qeexay Xeerka Ilaalinta Bulshada lehna ujeedooyin gaar ah, oo ay ku jiraan:

- **Hel, abuur, ilaali oo taageer guri bulsho;**
- **Hel, abuur, oo ilaali meel kor ka furan;**
- **Dib-u-hagaajinta iyo soo celinta goob kor ka furan ee lagu abuuray ama lagu helay dhaqaalaha ilaalinta bulshada;**
- **Hel, abuur, ilaali, dayactir oo soo celi dhulka loo isticmaalo madadaalada;**
- **Hel, la ilaali, dib u habee oo soo celi kheyraadka taariikhiga ah.**

Dhammaan mashaariicda la soo jeediyay waa inay buuxiyaan shuruudaha qeexitaannadan iyo shuruudaha lagu sheegay cutubka 44B

# MAAL GELINTA CPA

## *Lacagaha CPA maxaa loo isticmaali KARIN?*

- Lagu ma isticmaali KARO dayactir, kharash barnaamij, mise hawl socoto
- LAGU MA qaban karo naqshadaynta gudaha guriyaha, KELI ah lagu qaban karaa wanaajinta wayn ee dibadda, waa go'aan xeereed ee Boston CPA
- LA MA OGOLA astaan diimeed
- LA GU MA iibsan karo cawska macmalka ah ee garoomaha tartanka
- LAGU MA qaban karo tartanka faraska ama eyga ama u isticmaalka dhulka garoomaha tartanka, goob jimicsi ama dhismo la mid.
- MA JEBIN KARO sharciga Anti-Aid Amendment (Beddelaadka Anti-Aid) ee Dastuurka Massachusetts

**(Lacagaha dadwaynaha waa mamnuuc in loo isticmaalo danta gaarka, waa waajib in lacagaha dadwayne lagu isticmaalo horumarinta danta dadweyne.)**

# Heshiiska Deeqda CPA



CITY OF BOSTON
COMMUNITY PRESERVATION COMMITTEE

SICUT PATRIBUS SIT DEUS NOBIS
BOSTONIA.
CONDITA A.D.
1630.
CIVITATIS REGIMINE DONATA A.D. 1822.

GRANT AGREEMENT

**PROJECT NAME:**
**PROJECT LOCATION:**
**DATE OF APPROPRIATION: March 31, 2021**
**PROJECT DESCRIPTION:** ***description with smaller font:*** the project description; no longer than a couple of sentences to match that of the City Council. If necessary, a more detailed description can be added in the *Project Application and Statement of Grant Award* page.)

**PROJECT SPONSOR/APPLICANT:**
**GRANT RECIPIENT:**
**GRANT RECIPIENT VENDOR:**
**CONTRACT NUMBER:**
**ASSESSOR'S NUMBER:**
**BEGIN DATE:** **END DATE:**

| ACCOUNT | FUND | DEPT ID | PROGRAM | CLASS | PROJECT | BUD REF | FUNCTION | AMOUNT |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 52925 | 204 | 138710 | 0000 | 0000 | | 2021 | N/A | |

1

- Waa heshiis xagga sharciyeed aan la jebin karin
- Shuruudda Heshiiska Deeqda waxaa ku jiri karaan xaddid mulkiilenimo (xaddidid joogto)
- Ballan qaad muddo 15 sano
- Shuruudda ee lacagta dib lagaaga ceshan karo ee dhawrka sanadood

| | |
|---|---|
| **Shan (5) sano** | **100%** |
| **Toban (10) sano** | **75%** |
| **Shan iyo toban (15) sano** | **50%** |

- Heshiisyada Deeqda laga ma gorgortami karo
- Mashrucyada helay lacagaha CPA waxaa la rajaynayaa in la dhammaystiro 24 bilood gudahooda – Guriyaha la Awoodi Karo na 60 bilood gudahooda (5 sano)



# U HOGAANSANAANTA SANADLAHA EE LOO BAAHAN YAHAY

*Booqashada Goobta Sanadlaha, Faa'idada Dadweyne, Dayactirka*

# Booqashooyinka lagu eegayo U Hogaansanaanta iyo Ka Warbixinta



COMMUNITY PRESERVATION ACT

CITY OF BOSTON CPA GRANT COMPLIANCE MONITORING FORM

Section 1. Open Space and Recreation General Project Information

Project name:

Project category:

Contract ID:

Funding Year:

Date of Compliance Visit:

Contact for Compliance Visit:

Email:

Phone:

Summary of CPA funded scope of work:

Internal Checklist:

- ☐ Historic Preservation/or Open Space monitoring notes and maintenance photos have been uploaded to the Compliance folder in CPA Google Drive.
- ☐ Closeout paperwork and final budget with detailed scope of work completed was reviewed before compliance site visit.

CPA COMPLIANCE MONITORING FORM

1

- La xiriirkaada xafiiska CPA ku ma eka dhammaystirka mashruucaada. Inta lagu jiro mudada heshiiska deeq bixinta 15ka sano aad la gashay Magaalada Boston, waxaa jiri doonaa booqasho sanadle ee lagu baarayo u hogaansanaanta mashruucaada dhammaaday.
- Shaqaalaha U Hogaansanaanta CPA ayaa booqan doonaan goobtaada ka dib markay kuugula heshiiyaan waqtiga booqashada u hogaansanaanta. Mudada booqashada goobaha ayaa ah 30 daqiiqo ilaa hal saac. Inta lagu jiro booqashada waxaa jiri doonaa wareysi gaaban ee la buuxinaayo ee cabbiraayo dayactirka iyo faa'ido dadweyne uu hayo mashruucaada la dhammaystiray. CPA waxay qiimeyn doontaa in goobtaada mashruuc ay ilaalinayso danta dadweyne ee lagu tilmaamay codsigaada.
- Qiimeynta faa'idada dadweyne, dayactirka dhismaha goobtaada mashruuc ayaa sidoo kale laga kormeeri doonaa iyadoo la filaayo inuu burbur degdeg ku imaanin dayactir la'aan awgeed.



# GUDDIGA CPA

*Ku taliyaa Mashaariicda Duqa Iyo Golaha Deegaanka*

# YAA KU LUG LEH

**Duqa magaalada :**

- Wuxuu magacaabayaa 5 xubnood oo ka socda guddiyo gaar ah & komishin
- Duqa magaalada ayaa dib u eegaya mashaariicda CPA la qorsheeyay

**Golaha Deegaanka :**

- Wuxuu u magacaabayaa 4 qof oo bulshada deggan guddiga CPA
- Golaha Magaalada ayaa qaata go'aanka ugu dambeeya ee lagu maalgeliyo mashaariicda CPA

**Guddiga CPA :**

- Wuxuu abuuraa qorshe sanadeed wuxuuna ansixiyaa miisaaniyad sanadeedka
- Waxay dib u eegis ku sameeyaan soo jeedinta mashruuca waxayna sameeyaan talooyinka maalgelinta

**Shaqaalaha CPA:**

- Wuxuu maamulaa barnaamijka CPA wuxuuna caawiyaa Guddiga CPA
- Waxay si dhow ula shaqeeyaan Duqa Magaalada, Codsadayaasha & Golaha Magaalada

# GEEDI-SOCODKA CPA

*Codsiga iyo Shuruudaha u-qalmitaanka*

# ISTICMAALKA LA OGGOL YAHAY - GURI LA AWOODI KARO

one+
BOSTON
For your first home

*Barnaamijka Guriga Iibsadaha Waqtiga ugu horeeya*



*Barnaamijka Ka-hortagga Barakaca*



*Abuuritaanka Kirooyinka La awoodi karo*



*Abuurista Lahaanshaha Guryaha La Awoodi Karo*

- **Hanti helida:** Hel iibsiga guri, deeq, kiro, iibsi kiro,
- **Abuuridda:** In la sameeyo waxaan horey u jirin ama sabab jiritaan
- **Taageero:** Sii deeqo, deymo, caawimo kiro, dulsaarka hoos u dhacaya, gargaar guryaha bulshada
- **Ilaalinta:** Ka ilaalinta qofka ama hantida maguurtada ah dhaawac, waxyeelo ama burbur
- **Baxnaaninta & Soo Celinta:** haddii lagu helo ama lagu sameeyo maalgelinta CPA

# SHURUUDDA LOGA BAAHAN YAHAY CODSIYAALKA SOO JEEDINTA GURIYAHA LA AWOODI KARO

- **Waxaa qasab inaad xiriir la samayso Xafiiska Duqa Magaalada ee Hoyga (MOH) - Gaar ahaan haddaa tahay guri dhise hor leh.**
- **CPA waxay bixisaa Codsiga Soo Jeedinta (RFP) iyadoo la socoto (MOH) xili walba ee maal gelineed iyagoo shuruud gaar u leh maal gelinta xilli walba.**
- **Waa inaad leedahay waayo aragnimo dhismo ama aad la shaqaynayso guri dhise waayo aragnimo leh.**
- **Guri dhiska wuxuu u baahan yahay lacag badan sifo loo fuliyo, miyaa haysata lacag ku filan?**
- **Guriyaha aad dhiseysaa ma guriyo kiro baa mise waa guriyo la mulkin doono?**
- **Lacagaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu ilaaliyo guriyaha inay ahaadaan kuwo la awoodi karaa laakin lacagaha lagu ma isticmaali karo in lagu dayactiro guriyo hore.**

# ISTICMAALKA LA OGGOL YAHAY - ILAALINTA TAARIIKHIGA AH



*Dhismayaasha*



*Qaab dhismeedyada*



*Maraakiibta*



*Guryaha*




*Dukumeenti ama Agabyo Farshaxan*

- **Hanti helida:** Helitaanka gurii ama iibsi, waxay u baahan doontaa xaddidid ilaalin
- **Baxnaaninta & Dib u soo Celinta:** Samee hagaajin raasamaal ama dayactir aan caadi ahayn
- **Ilaalinta:** Ka ilaalinta qofka ama hantida maguurtada ah dhaawac, waxyeelo ama burbur

**Maalgelinta Kheyraadka Taariikhiga ah** ee **ku qoran Diiwaanka Gobolka ee Goobaha Taariikhiga a**h **-ama-** ay **go'aamiyeen Boston Landmarks Commission** inay muhiim u yihiin taariikhda qadiimiga, dhismaha ama dhaqanka caasimada ama magaalada.

- KALIYA hagaajinta raasamaalka dibadda
- KALIYA waxaa loogu talagalay hagaajinta raasamaalka dibadda

# SHURUUDDA LOGA BAAHAN YAHAY CODSIYAALKA ILAALINTA TAARIKHDA

- ➢ Maamulka goobta: Lahaanshaha goobta ama heshiiska kireysiga muddada dheer (ugu yeraan 15 sano)
- ➢ Mashruucyada HP waa qasab in loo qadiriyo kuwa goobta muhiim u ah (shaqaalaha CPA ayaa kula shaqayn doonaan):

  ○ (1.) Waa inay goobta ku liis gareysan tahay Diiwanka Gobolka ee Goobaha Taarikhiga ah
  ○ (2.) Waa in lala shaqeeyo Guddiga Goobaha Muhiim ee Boston (Boston Landmark Commission, BLC) sifo loo xaqiijiyo ahmiyadda deegaaneed ee raasumaalka

- ➢ Miyaa haysaa dukumeenti ama cilmi baaris: qoraal taarikhi, qorshaha ilaalinta, shuruudda qiimeynta, cilmi baarista surogalnimada, qorshaha wayn ee maal gelinta?
- ➢ Miyaa codsi u samaynaysaa Naqshadaynta, Iibsashada, Ilaalinta, Dayactirka, ama Dib u Hagaajinta? Naqshadaynta waa inay yeelato qodob dhismo ee boqolkiiba 70%.
- ➢ Waa intee qiyaasta lacag aad codsan doonto? Waxaad u baahan doontaa qiyaasid qof xirfad yaqaan.
- ➢ U diyaar ahaanshaha Horusocodka: geedi socodka qorsheynta halkeed ka joogtaa? Miyaa leedahay koox dhiiran?
- ➢ Masuulnimada: Miyaa leedahay qorshaha dayac tirka iyo wax soo saarka muddada dheer? Dayactirka waa ballan qaad 15 sano.
- ➢ Miyaa leedahay awoodda maamulka? Ma lahaan doontaa shirkadle lacageed?
- ➢ Waa maxay saamayntaada dadweyne mise bulshadeed?

# ISTICMAALKA LA OGGOL YAHAY - BOOS KOR KA FURAN & MADADAALO



*Jardiinada, Beeraha Magaalada & Wadooyinka Socodka Duurka*



*Wejiga hore ee barkadda & Geed abuurka*



**Dhulka ilaashan & Dhul Qoyaanka**



*Garoomaha ciyaarta*



**Garoonka ciyaarta basketball & garoomaha tartanka**

- **Iibsashada:** La wareega hantida ama **iibsashada waxay u baahan doontaa xaddidin ilaalineed**
- **Abuurka:** Aburidda ama u sababidda inuu abuurmo
- **Baxnaaninta & Dib u Hagaajinta:** In la sameeyo wax hagaajin wayn ama dayactir wayn ee boosaska madadaalada, **(boosaska furan keli ah haddii lagu helay lacagta CPA)**
- **Ilaalinta:** ka ilaalinta dhaawaca, waxyeelada, iyo burburinta hantida shaqsi ama hanti ma guurtada
- **La ma Ogola Cawska Macmalka ah - Lagu Qeexey Cutubka 44B**

# SHURUUDDA LOGA BAAHAN YAHAY CODSIYAALKA GOOBTA BANNAAN IYO MADADAALADA

- Maamulka Goobta: Lahaanshaha goobta ama heshiiska kireysiga muddada dheer (ugu yeraan 15 sano)
- Mashruucaada miyuu ku yaalaa dhul dadweyne mise dhul shaqsi? Miyaa la shaqeyneysaa wakaalad goboleed ama magaaleed? Miyay ansixiyeen mashruucaada?
- Miyaa codsi u samaynaysaa Naqshadaynta, Iibsashada, Ilaalinta, Dayactirka, ama Dib u Hagaajinta? Naqshadaynta waa inay yeelato qodob dhismo ee boqolkiiba 70%
- Waa intee qiyaasta lacag aad codsan doonto? Waxaad u baahan doontaa qiyaasid qof xirfad yaqaan.
- U diyaar ahaanshaha Horusocodka: geedi socodka qorsheynta halkeed ka joogtaa? Miyaa leedahay koox dhiiran?
- Masuulnimada: Miyaa leedahay qorshaha dayac tirka iyo wax soo saarka muddada dheer? Dayactirka waa ballan qaad 15 sano.
- Miyaa leedahay awoodda maamulka? Ma lahaan doontaa shirkadle lacageed?
- Waa maxay saamayntaada dadweyne mise bulshadeed?

# TALAABADA 1AAD:
## AQOONSO MASHRUUCAAGA

*Aqoonso mashruucaaga, booqo websaydkeena oo la xiriir shaqaalaha CPA wixii su'aalo ah.*

B

# TALAABADA 2AAD:

## BUUXI FOOMKA U-QALMITAANKA

*Kadib markaad dib u eegtay dhammaan macluumaadka CPA ee ku jira websaydkeena, ka qaybgashay kulan xog, kala hadasho mashruucaaga shaqaalaha CPA, oo aad buuxisp foomka u-qalmitaanka loo baahan yahay.*

# TALAABADA 3AAD:

## BUUXI CODSIGA CPA

*Shaqaalaha CPA ayaa dib u eegi doona mashruucaaga oo go'aamin doona haddii lagu maalgelin karo shuruudaha Xeerka Ilaalinta Bulshada. Hadday sidaas tahay, waxaad heli doontaa caasuumaad aad ku buuxiso codsiga lagu tixgelinayo maalgelinta deeqda CPA.*



# TALAABADA 4AAD:

## MASHRUUCA LOO GUDBIYAY DIB U EEGISTA

*Guddiga CPC ayaa dib u eegis ku sameyn doona codsiyada la soo gudbiyay waxayna u soo jeedin doonaan talooyinka Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada si ay ugu codeeyaan maalgelinta ugu dambeysa.*

# SIDA LOO CODSADO




**<u>*Sida Loo Codsado Lacagaha Ilaalinta Bulshada*</u>**

# Dib baa u codsan kartaa Maal gelinta CPA

## Udhiiranaanta waa muhiim

- Haddii mashruuca la maal gelin waayo, fadlan ha quusanin. Mashruucyadeena ugu xoog badan waxay hortagaan Guddiga CPA waxaana dooneynaa inaanu kaala shaqayno sidaanu taada oga dhigi lahayn kuwaa mid ka mid ah.

- Maal gelinta sanad walba way jirtaa sidaa darteedana dib u codsiga ayaa si xoog leh lagu dhiiri gelineyaa.

# WEBSAYDHKA CPA WAA KHEYRAAD QIIMO LEH




## Visit our website

[WWW.BOSTON.GOV/CPA](http://WWW.BOSTON.GOV/CPA)

## CPA Team

- **Thadine Brown**, Agaasimaha - thadine.brown@boston.gov
- **Rakia Islam**, Maamulaha Ka Qayb Gelinta iyo Hawl Galka - rakia.islam@boston.gov
- **Lizbeth Sanchez,** Isu Duwaha Qandaraasyada iyo Hawl Galka - lizbeth.sanchezrincon@boston.gov
- **Amber Delgado**, Maamulaha U Hogaansanaanta Deeq Bixinta - amber.delgado@boston.gov
- **Gillian Lang,** La Taliyaha Ilaalinta Taarikheed - gillian.lang@boston.gov
- **Kenya Thompson,** Maamulaha Mashruucyada & Qorsheynta - kenya.thompson2@boston.gov
- **Wenjia (Lauren) Han,** Maamulaha Ilaalinta Taarikhda - wenjia.han@boston.gov
- **Liz Cook,** Maamulaha Goobta Bannaan iyo Madadaalada - elizabeth.cook@boston.gov